



8&lt;

**KNOW YOUR RIGHTS***Responding to Hate Crimes*

Waxay tahay inaad samayso dhacdo ama fal-dambi nacayb ka dib:

- Hadii lagu soo weeraro ama aad dareento inaad khatar ku jirto, si degdeg ah u wac 911.
- Raadso daryeel caafimaad iyo maskaxeed. Hayso waraaqaha daawayn kasta oo aad hesho.
- Diiwaan geli xaaladda. Qor wixii dhacay, luuqadda la isticmaalay, hadii ay kula saxnaatana sawiro ka qaad.
- Hadii aad ku jirto xaalad aan degdeg ahayn, aadna ka werwersan tahay xaaladdaada socdaal, Fadlan la xidhiidh abukaate socdaal si aad uga hesho talo ku saabsan sida soo sheegidda arintani u saamayn doonto kiiskaaga socdaal/qaxoontinimo.
- Soo sheeg. Si dhacdada wax looga qabto, loona hubiyo inaanay dadka kale la kulmin dhacdadan usoo sheeg CAIR.

KOOBAN

**KNOW YOUR RIGHTS***Responding to Hate Crimes*

MACLUUMAADKANI MAAHA IN LOO TIXGELIYO TALO SHARCI.



[WWW.CAIR.COM](http://WWW.CAIR.COM)



*Council on American-Islamic Relations*

## SIDA LOOG FAL-CELIYO DEMBIYADA IYO DHACDOOYINKA NACAYBKA KU DHISAN

- + Fal-dembiyeed nacayb waa dhacdo lagula kaco qof ama hantidiisa taas oo ay dhiirigelisay dulmanaha midabkiisa, diintiisa, dhalasha ahaan meesha uu ka soo jeedo, qawmiyadiisa, jinsigiisa, naafo-nimadiisa, iyo mararka qaar, doorashada xidhiidhkiisa jinsi amase sida uu jecelyahay in uu jinsigiisa u qeexo. Dhacdadan waxa ay noqon kartaa gacan-ka-hadal, weerar dhanka afka ah iyo in la soo weeraro hantidaada.
- + Hadii aad la kulanto qof la aflagaadaynayo ha ka hortagin dembiilaha. Taas dhigeeda, xidhiidh sheeko la samee dulmanaha isna illowsii dembiilaha. Kala sheekayso mawduucii kugu soo dhaca una samee dulmanaha meel aamina ilaa inta uu ka tegayo dembiiluhu. Hadii ay muhiim noqoto u kaxee dulmanaha meel aamin ah.

## WAXA AY TAHAY IN LA SAMEEYO KA DIB DHAC- DO AMA FAL-DEMBIYEED NACAYB KU DHISAN:

- + Hadii lagu soo weeraro ama aad dareento khatar, wac 911 sida ugu dhakhsaha badan
- + Raadso daryeel caafimaad iyo maskaxeed. Hayso waraaqaha la xidhiidha daawayn kasta oo aad hesho.
- + Diiwaan geli dhacdada. Qor waxa dhacay, luuqada la isticmaalay, hadii ay suure tahayna sawiro ka qaad.
- + Soo sheeg. Si dhacdada wax looga qabto, loona hubiyo inaanay dad kale la kulmin caga-juglayntan, usoo sheeg CAIR.
- + Hadii aanad ku jirin xaalad degdeg ah, misna aad ka werwersan tahay xaaladaada qaxoontinimo/magan-ngalyo doon, Fadlan kala xidhiidh sharciyaqaan dhanka qaxoontinimada ah sida warbixinta dhacdadani ula xidhiidhi karto kiiskaaga magan-galyo doon.

